



UJEEDO: WAKAALAD GAAR AH "PROCURO DE SPECIALE"

Maanta oo ay taariikhdu tahay 15/01/2026, Anigoo ah Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo", Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha Dhinaca Galbeed ee Daarta Maalin Taajir ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iyyimid ayagoo heshiis ah, Mudanyaasha hoos ku Xusan:-

WAKAALAD BIXIYE:- BASHIR MOHAMED HASSAN, Hooyo: Kaho Maxamuud Hufane, Somali ah, Ku Dhashay: Beledweyne, Sanadkii: 15-01-1996, Sita: Somali Passport, Lr. P01034564

LA WAKIISHE:- MOWLID MOHAMUD AWALE FIDOW, Hooyo: Dahabo Xasan Barre, Somali ah, Ku Dhashay: Beledweyne, Sanadkii: 10-02-1995, Sita: Somali Passport, Lr. P01150285

B- Aniga oo ah **BASHIR MOHAMED HASSAN**, ahna Milkiilaha Shirkadda **ABUUR COFFEE ROASTERS & TRADERS LTD**, Sida ku cad Xeerka hoosaadka shirkadda **SUM.XNDH/5903/025, Tr.20-10-2025**, Kana soo baxday Xafiiska Nootaayaha Dhowrane, uuna ku saxiixanyahay Dr. Mohamed Isse Dhowrane, Waxaan qoraalkaan ku Cadaynayaa Aniga oo Maskaxda iyo Caqligaba ka fiyow Cid i qasbaysana aysan Jirin in aan Wakiishay **MOWLID MOHAMUD AWALE FIDOW** una wakiishay in uu maamulo, socodsiiyana kaalinteyda ku aadan Howl maalmeedka Shirkadda **ABUUR COFFEE ROASTERS & TRADERS LTD**, awoodna u leh maamulidda Shirkadda, kuna furi karo magaca Shirkadda Xisaab Bank (Accounts), kuna shubi karo kana saari karo lacagaha, iina saxiixi karo jeegaga, sidoo kalane la gali karo Heshiisyo Shirkadda dhigeeda ah, iina saxiixi karana qandaraasyada, kana qeyb gali karo shirarka Shirkadda ay yeelaneyso, iguna matali karo magaceyga goob iyo madal walba ee la iiga baahdo suul iyo Saxiixba kuna saabsan wax allaale iyo wixii khuseeya Shirkadda **ABUUR COFFEE ROASTERS & TRADERS LTD**, Iina saxiixi karo heshiisyadaa cusub ee dhismaha Shirkadda iyo heshiisyada ka mid noqoshada ama ku biirida Shirkadda Ee nootayada qortay, sidoo kale waxaan cadeynayaa in aan ogolahay in awoodaha uu adeegsanayo wakiilkeyga ee waafaqsan hirgelinta awoodaha lagu qeexayo Aatadaan ay yihiin kuwa sharci ah marka laga eego dhan walba kana dhiganyihiin Falalkeeyga

Waxaan mar kale sii caddeynayaa in **MOWLID MOHAMUD AWALE FIDOW** awoodaas aan siiyay uu u madax banaan yahay oo aniga Shirkaddaas aan soo sheegay ka macaamilideeda wax la iiga baahan karo aysan jiri doonin.

T- Aniga oo ah **MOWLID MOHAMUD AWALE FIDOW**, Waxaan Nootaayada Horteeda Ka Caddaynayaa in aan aqbalay Wakaalada uu isiiyey **BASHIR MOHAMED HASSAN**, islamarkaana aan Xilkaas aan ugu Soo Bixi doono Si Hufan oo Shareecada Islaamka Waafaqsan Insha Allah.

SAXIIXA WAKAALAD BIXIYAHA

BASHIR MOHAMED HASSAN

SAXIIXA LA WAKIISHAHA

MOWLID MOHAMUD AWALE FIDOW

SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

1- ABDULLAHI ABDIRAHMAN ADEN

2- ABDULLAHI ABDIRIZACK JAMA

(XAFIISKA NOOTAAYAHA)

REP. 2065/T.P.N/26, Tr. 15/01/2026, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo", Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee 1- BASHIR MOHAMED HASSAN Ahna (Wakaalad Bixiye), 2- MOWLID MOHAMUD AWALE FIDOW Ahna (La Wakiishe) iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Wakaaladaan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayada Wakaalada Keydiyey Nuqul.

By: ABDULLAHI ABDIRAHMAN ADEN

NOOTAAYAHA

Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"





FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
DHOWRANE PUBLIC NOTARY OFFICE

Xeer hoosaadka shirkadda:

ABUUR COFFEE ROASTERS & TRADERS LTD

MOGADISHU-SOMALIA

2025



Ujeeddo: qoraal lagu dhisayo Shirkadda magaceeda la yiraahdo ABUUR
COFFEE ROASTERS & TRADERS LTD

Muqdisho maanta oo ay tr. 20/10/2025 Aniga oo ah Dr: Mohamed Isse Dhowrane Xafiis Nootaayo Dhowrane ku leh Degmada Waabari gaar ahaan Tree Piano lehna sharciyadda Nootaayada magaceedu kor ku qoran yahay waxaa marag la'aan horteyda yimid.

BASHIR MOHAMED HASSAN, Soomaali ah, kuna dhashay Beleweyn sanadkii 1996-tii, degan Muqdisho, lehna (Passport-ka No: P01034564 ee warqadaan ku lifaaqan..

kaasoo Anigu nootaayo ahaan aan aqoonsaday hubsaday in magacaas la yiraahdo sida ku cad warqadda sugnaanta, wuxuuna iga codsaday in aan u qoro xeer shirkadeed (Company Law). Waana sidaan xeerku:

Qaybta Iaad

Magaca, Saldhiga, Ujeedada iyo muddadda jiritaanka Shirkadda

Waxaa La dhisay Shirkada la magac baxday ABUUR COFFEE ROASTERS & TRADERS LTD

1. waxaana la aas'aasay 03/02/2025
2. Saldhigga shirkadda waa muqdisho, shirkaddu waxay laamo iyo xafiisyo kale ka furan kartaa gobolada kale ee Dalka.
3. Ujeedada shirkadda waa:-
 - ✓ Ka qeyb qaadashada hormarka dalka.
 - ✓ Ka ganacsiga badeecooyinka Sida
 - Coffe iyo Agabkiisa,
 - Caleenshax ,
 - Qorfo iyo Hayl
 - Sanjabiil
 - ✓ Kana shaqeyta Coffe Iyo Caleenshax Jumlo iyo Tafaariiq.
 - ✓ Bixinta Coffe Iyo Caleenshax casri ah.
4. Astaanta shirkadda waa sidaan waxayna ka mid tahay hantida shirkadda



5. Muddadda jiritaanka shirkadda waa 50-sano, mudadaas iyada ah haddii Milkiilaha shirkadda uu rabo waa la kordhin karaa waana la yareyn karaa inta aan la gaarina waa la baabi'in karaa.

Qaybta 2aad

Maaliyadda shirkadda

1) Maaliyadda shirkadu waa **\$10,000** (Toban kun oo dollar).

tiro	Magaca	Heerka shaqo	Maaliyadiisa	boqolkiiba
1.	BASHIR MOHAMED HASSAN	Owner	\$10,000.	100%
TOTAL			\$10,000.	100%

2) Waxaa la kordhin karaa mulkilyaasha markii oggolaasho laga helo mulkiilaha shirkadda.

Qaybta 3aad

❖ Shirka guud ee shirkadda

- 1) shirka guud waxaa wici kara gudoomiyaha waxaana shirka lagu qabanayaa meeshii uu tilmaamo, Ogeysiiska Fadhiyadda la isugu yeerayo waa in ay ku cad yihiin, Maalinta, Saacadda, Meesha fadhigga lagu qabanayo iyo arrimaha laga hadlayo, ogeysiiskaas oo sidaas u dhigan waa in gudoomiyaha shirkadda u diraa mulkilyaasha iyo saamileyda shirkadda laguna gaarsiiyo warqad qoraal ah ugu yaraan 15-maalmo ka hor maalinta shirka la qabanayo qofkii jooga dalka guddihiisa, kan dibadda ku maqana 30-maalmo ka hor inta aan shirka la qaban.
- 2) Shirka guud ee shirkadda waxaa gudoominaya Gudoomiyaha Shirkadda ama Maamule idman.
- 3) Shirarku waa kuwo caadi ah iyo mid aan caadi ahayn
- 4) Go'aanadda ka soo baxa shirarkaas la fariisto waa in lagu qoraa buug u gaar ah waxaana qoraya xog-haye, waxaana qoraalkaas wada saxiixaya gudoomiyaha iyo xog-hayaha shirka haddii xoghayaha shirka uu noqdo Nootaayo qoraalkaas waxaa saxiixaya gudoomiyaha iyo nootaayaha waana in ay ku cad yihiin qoraalkaas doodii shirka iyo go'aankii la gaarey.



Qaybta 4aad

❖ Gudoomiyaha ama Keli maamulaha idman

- 1) Shirkadda waxaa Maamulaya Mulkiilaha ama keli maamule idman waxayna Awood buuxda u leeyihiin in ay sameeyaan wax alle iyo wixii ku saabsan maamulka caadiga ah ee shirkadda.
- 2) Haddii hal xubin oo ka mid ah Maamulka uu xilkiisa ka dhaco, sababkasta ha ku timaadee waa in si deg deg ah shir guud shirkadda la isugu yeeraa si loo magacaabo xubintaas bedelkeeda.
- 3) Xubnaha guddigga maamulka iyo keli maamulaha idman waxay xaq u leeyihiin in loo celiyaa kharashka kaga baxa danaha iyo shaqada shirkadda.
- 4) Gunnada la siinayo guddigga maamulka ama keli maamulaha idman waxaa xadidaya shirka guud ee mulkiilaha shirkadda.

Qaybta 5aad

❖ Awooda gudoomiyaha shirkadda

- 1) Waa hogaamiyaha, hagaha, socodsiiyaha hawlaha shirkadda.
- 2) Wuxuu awood u leeyahay in uu isugu yeero shirarka caadiga ah iyo kuwa aan caadiga ahayn.
- 3) Waa kormeeraha dhamaan hawlaha shirkada.
- 4) -Wuxuu awood u leeyahay in uu si ku meel gaar ah shaqada uga joojiyo agaasimayaasha waaxyaha iyo Shaqaalaha Muhiimka ah.
- 5) Wuxuu awood u leeyahay in uu cid kale shaqada si ku meel gaar ah ugu sii magacaabo mudo kooban.

Qaybta 6aad

❖ Mudada xilka gudoomiyaha

- 1) Mudada xilka gudoomiyaha waa inta uu leeyahay Company 100%
- 2) Fiiro gaar ah, Shirkadaan hadda waxaa iska leh hal Qof (shaqsi keli ah), xeerkaani wuxuu quseeyaa marka la kordhiyo mulkiilayaasha shirkada.

Qaybta 7aad

❖ Guddigga baarista xisaabaadka Shirkadda

Guddigga baarista xisaabaadka shirkadda waxay ku shaqeynayaan sharciga xisaabaadka caalamka oo casri ah.



Qaybta 8aad

❖ Miisaaniyadda shirkadda

1) Sannad waliba marka la gaaro June, guddigga maamulka ama Keli maamulaha idman waa in ay soo diyaariyaan Miisaaniyadda sanadkii tegey. qoraaladda miisaaniyadda waa in ay ku cad yihiin Faa'iidada, Khasaaraha isla markaasna lagu soo tifaftiro xaaladda ay ku sugan tahay hantida shirkadda.

Warbixinadda guddigga maamulka iyo kan baarista ay soo qorayaan waa in ay xisaabta miisaaniyadda la socdaan.

Qaybta 9.aad

❖ Baabi'inta shirkadda iyo Bedelaada Xeerka

- 1) Haddii la damco in shirkadda la baabi' iyo sababkasta ha ku timaadee shirka guud ee shirkadda waxaa lagu magacaabayaa hal ama labo nin oo xira xisaabta guud ee shirkadda.
- 2) Wax allaale iyo wixii aan halkaan ku qorneyn waxaa loo raacayaa sida uu qabo Sharcigga Islaamka & Xeerarka J.F.S. ee quseeya shirkadaha noocaan ah.

Saxiixa mulkiilaha Shirkadda

BASHIR MOHAMED HASSAN



Xafiiska Nootaayo Dhowrane

saxiixa la sugay


SUM. XNDH/5903/025


Tr. 20/10/2025

Anigoo ah xafiiska Nootaayo Dhowrane Dr. Mohamed Isse Dhowrane oo ku yaalla Degmada Waabari gaar ahaan Tree Piano waxaan halkaan ku sugayaa in saxiixa sare ku qoran uu yahay kii dhabta ahaa ee **BASHIR MOHAMED HASSAN**, waxuuna ku saxiixay xafiiska dhexdiisa iyadoo aan cidina qasbin qowl iyo ficilba, kadib markii uu iska akhriyey fahmey kuna qancay waxaan ku qoray oo ka saxiixay diiwaanka guud ee nootaayadda.

Xafiiska Nootaayadda Dhowrane

Dr/ Mohamed Isse Dhowrane





JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

جمهورية الصومال

SOMALI REPUBLIC

BAASABOOR جواز سفر PASSPORT



Nooqa / النوع / Type Astaanta Dalka / رمز البلاد / Country Code

P

SOM

P01034564



Magaca / الاسم / Name

BASHIR MOHAMED HASSAN

Magaca Hooyada / اسم الأم / Mother's Name

KAHO MOHAMUD HUFANE

NID: 29601152669825

Jinsiyada / الجنسية / Nationality

SOMALI

Shaqada / المهنة / Occupation

EMPLOYEE

Taariikhda Dhalashada / تاريخ الميلاد / Date of Birth

15 Jan 1996

Meesha laga Bixiyo / مكان الإصدار / Place of Issue

BELEDWEYN

Lab Dheddig / الجنس / Gender

MALE

Meesha Dhalashada / مكان الميلاد / Place of Birth

BELEDWEYN

Taariikhda la Bixiyo / تاريخ الإصدار / Date of Issue

17 Apr 2021

Xatibaha laga Bixiyo / جهة الإصدار / Issuing Authority

SOMALI GOVERNMENT

Taariikhda uu Dhacayo / تاريخ الانتهاء / Date of Expiry

16 Apr 2026

Saxiixa Qofka / توقيع حامل الجواز / Holder's Signature



P<SOMHASSAN<<BASHIR<MOHAMED<<P010345646SOM9601156M26041692960115266982548




FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA

Tr. 17/01/2026

Aniga oo ah **Cabaas C/laahi Maxamed** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **Mowliid Maxamuud Cawaale Fiidow** Dukumiintiga **Original** Wakaalada Gaarka ah **Rep No. 2065/T.P.N/26, Tr. 15/01/2026**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

Magaca La Wakiishaha	Mowliid Maxamuud Cawaale Fiidow
La Wakiishay	
Taariikhda Wakaalada	15/01/2026

La Wakiishe: Aniga oo ah **Mowliid Maxamuud Cawaale Fiidow**, Leh Tel No. **0615408466**, Degan **Muqdisho** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaatay Xafiiska **Nootaayaha Tayo** Dukumiintiga Wakaalada faah faahinteedu Sare ku cadahay.



SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA

Cabaas C/laahi Maxamed

SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA

Mowliid Maxamuud Cawaale Fiidow